**Xeerka Sharci 4 Maajo 1960, lamba. 5 diw.**

**Xeerarka ku saabsan qoritaanka askarta Xoogga Dalka, ee Soomaaliya.**

## MAAMULUHU

Markuu arkay X.M.J, ee 9 Disenmbar 1952, lamba. 2357;
Markuu arkay Sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1;
Markuu arkay XM, ee 18 Maajo 1956, lamba. 78;
Markuu arkay sharciga 6 Abiriil 1960, lamba. 15;
Markuu garwaaqsaday fursadda, xagga wixii la xiriira waxa uu dhigayo Qod. 4aad, ee sharciga horey loo soo xigtat, ee 6 Abiriil 1960, lamba. 15, in la soo saaro xeerar ku saabsan qorista askarta lagu dhisyo Xoogga Dalka;
Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;
Ayada oo lagu saleeyey soojeedinta Wasiirka Kowaad iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha;

## WUXUU XEERAYAA

### Qod. 1
### Qorista Askarta – Xeerar Guud

Askarta Xoogga Dalka Soomaaliyeed waxaa lagu qorayaa habka qorashada ikhtiyaariga, oo lagu bandhigo tartamo loogu talagalay, xuduudda tirada iyo tayada ciidanka u degsan gudaheed.

Askar-qorista waxaa lagu sameynayaa qoondooyin gobolgoboleed.

— Axkaam gaar ah ayaa laga soo saarayaa qorista saraakiisha iyo saraakiil – xigeennada kuwa ka tirsan qaybo mucayin ah, ee takhasuus leh.

### Qod. 2
### Shuruudaha Askar-qorista

Waxaa qorashada ikhtiyaariga ah, ee askarnimada, oo ku xusan Qod. hore, waxaa raadsan kara muwaadiniinta soomaaliyeed oo:

1) ku jira xadka da'da loo gooyey tartan kasta oo "askar-qorista";
2) haysta shuruudaha jireed ee looga baahan yahay, sida ay u-arkaa Guddiyada gobollada, ee askar-qorista, oo ku xusan Qod. 4aad, ee Xeerkan;
3) leh akhlaaq wanaagsan iyo hab-dhaqan suuban;
4) uusan ku dhicin xukun ciqaab xabsi oo la xiriira debiyo ula-kac ah;
5) aan horay looga sii-deyn ama looga saarin, sababo xagga anshaxa ama u-qalmid laáan jireed oo weli jira, ciidan kale ama ciidamada Qalabka Sida, ee Dowladda.

### Qod. 3
### Soo-bandhigid Tartan Askar-qorista

Ogeysiisyada ku saabsan tartanka "qorista askarta ikhtiyaarka ah, oo lagu diyaariyey xeer uu soo-saaro Wasiirka Kowaad, oo ka duulaya soojeedinta Wasiirka Difaaca, dhegeystayna Golaha Wasiirrada waa in uu tilmaamo waxyaabaha soo socda:

1) nooca askar-qorista iyo tirada jagooyinka tartanka la geliyey;
2) xeerarka ka-qeybgalka tartanka askar-qorista iyo shuruudaha looga baahan yahay;
3) hababka lagu hubinayo u-qalmidda askarnimada, ee xagga dhismaha iyo dhammida jir

ahaaneed, ee dadka ka qaybgelaya tartanka iyo shuruudaha kale ee laga rabo dadkaas;

4) wixii macaayir ah oo mudnaan iyo ku kala-hormarid u leh isqorista;
5) qoondaha loo meel-dhigay noocyo dadka mid ah;
6) qeybinta jagooyinka tartanka loo geliyey, ayada oo lagu saleynayo qoondooyinka gobollada;
7) muddada tababarka aasaasiga ah, xilliga tababarka ciidanka iyo kan tababarrada naqtiinka ah (ku-celiska);
8) mushaarka bilowga ah;
9) tilmaan kasta oo wax-ku-ool ah.

**Qod. 4**
**Guddiyada Gobollada, ee Askar-qorista**

Hawlgallada askar-qorista waxaa fuliya guddiyo gaar ah oo heer gobol ah oo uu dhiso (cayimo) Taliska Ciidanka.

Guddi kasta waxa uu fadhi ku yeelanayaa Xafiisyada Gobolka, kaas oo loo xilsaaray, wuxuuna ka kooban yahay sidan:

— hal sarkaal oo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka, oo uu magacaabayo Taliyaha Ciidanka - Madaxweynaha;
— hal sarkaal oo ka tirsan Ciidamada Booliska, oo uu soo cayimo Taliyaha - Xubin;
— hal dhakhtar oo ay magacawdo Wasaaradda Caafimaadka , Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada;
— Laba sarkaal-xigeen, oo uu magacaabo Taliyaha Ciidanka -Xubno.

Mid ka mid ah labada sarkaal-xigeen ayaa lagu aaminayaa hawlaha (xilalka) xoghaye.

Guddi kasta waxaa kale oo ka hawlgala:

— hal hawlwadeen oo shaqaalaha rayidka oo joogtada ah, oo uu cayimo Guddoomiyaha gobolka, oo leh sifo goobjooge;
— hal Qaaddi, oo uu cayimo Garsooraha gobolka (Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka, kaaliye ahaan;
— hal askari oo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka, oo uu soo cayimo taliyaha Xoogga Dalka, oo uu soo cayimo taliyaha Ciidanka, kaas oo shaqadiisu tahay makiinad-garaace.

Si ay si wanaagsan ugu gutaan xilalkooda, Guddiyadu waxa ay karaa in ay ku socsocdaan gudaha xuduudda gobol kasta, xarumaha Degmooyinka kala duwan.

Marka ay dhammeystiraan hawlgalladooda, Guddiyada waa la kala dirayaa.

**Qod. 5**
**Hawlaha Guddiyada Gobollada, ee Askar-qoridda**

Guddiyada Gobolladu waxay leeyihiin hawlaha soo socda:

1) inay degooyinka gobollada, ayaga loo xilsaaray, haddii loo baahdo, ay sí siman ugu qaybiyaan qoondaha dhursugeyaasha tartanka, ee gobolka;
2) in ay ku dhaqaaqaan baaritaanka codsiyada dhursugeyaasha, baaritaan dhakhtareedna geliyaan dhursuge kasta, sí loo hubiyo in uu qalmo askar-qorashada;
3) in ay ku dhaqaaqaan, dadka u-qalma dhexdooda, xulashada kuwa lagu qori karo, gudaha xuduudda qoondooyinka loo dejiyey, iyadoo la raacayo macaayirta mudnaanta iyo kala horreynta loo dejiyey tartan kasta;
4) in ay kuwa u-suubban askarnimada ogeysiiyaan (ku wargeliyaan) in taariikhda qoritaanka in Taliska Ciidanka Xoogga. ee Soomaaliya, uu ayagoo dhan u goynayo iyo in

taariikhdaas dabadeed uu ku dhawaaqayo, ayada oo loo marinayo Degmooyinka, ayagana ay waajib ku tahay in ay xaadiraan xarumaha tababarka loo tilmaamayo.

**Qod. 6**
**Waajibaadka ka Dhalanaya Ciidan-Qorashada**

Marka la qoro, kuwa la qoro waxay qaadanayaan dhammaan waajibaadka ka dhasha maqaamooda cusub laga bilaabo isla waqtigaasna waxaa lagu dhaqayaa sharciyada milatariga.

**Qod. 7**
**Xarumaha Tababarka Leyliga**

Ayada oo uu marayo Taliska Ciidanka Xoogga, waxaa la dhisayaa Xeryo Tababar leyli askareed - oo leh dabeecad joogto ah ama ku meel gaar ah - halkaas oo ciidan-qortayaalku ay tahay in ay ku gutaan muddada tababarka aasaasiga ah, oo ku xusan Qod. soo socda.

Shaqaalaha Xeryaha Tababarka, Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka ayaa, si ku habboon uga soo dhex dooraya saraakiisha, saraakiil-xigeennada iyo aliflaha ilaa laba-alifyaasha, kuwaas oo sí gaar ah oo hufan ugu qalma fulinta xilka gaarka, ee tabarayaal.

**Qod. 8**
**Muddada Tababarka aasaasiga ah**

Markay gaaraan Xerada Tababarka, kuwa la qoro waxay marayaan tababar aasaasi ah oo ah muddada lix bilood.

Inta lagu jiro muddadan, ayada oo laga duulayo soojeedinta Taliyaha xerada tababarka, iyo góaanka lagama doodaanka ah ee Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka, kuwa askarta loo qoray waxaa laga sii-deyn karaa waajibaadka ay qaadeen:

1) kaddib markii ay soo qaddimaan dalab la xiriira sababo dan gaar ah oo la xaqiijiyey darteed;
2) sabab la xiriirta u-qalmid laáan xagga jirka oo la hubiyey, oo lagu ogaaday baaritaan caafimmad oo dheeraada oo dambe, oo kuwa kuruudka (Dhibow/leyli) la marin karo inta lagu jiro muddada tababarka aasaasiga ah;
3) edeb iyo asluubdarro culus;
4) ka-marnaansho habdhaqan askareed.

**Qod. 9**
**Karuudka iyo lagu kala daro Cutubyada Xoogga**

Marka muddada tababarka aasaasiga ah ay guul ku dhammaato, kuwa kuruudka, iyaga oo maraya dhaar loogu talagalay, waxa ay ballanqaadayaan in ay gelayaan tababar soconaya muddo afar sano ah iyo, in Taliyaha Xooggana u kala qaybnayo (ku kala darayo)qaybaha kala duwan, ee Ciidanka.

Marka laga reebo waxa ay dhigayaan xeerarka militariga, inta lagu jiro mudada xiranka yahay, uu Taliyaha Ciidanku awood u leeyahay inuu askariga ka sii-daayo waajibaadka uu qaaday marka uu asagaas codsado.

**Qod. 10**
**Tababar Dheeraad ah**

Dhamaadka muddada tababarka leyli, ee ku xusan Qod. 9aad, askarta militariga waxa ay codsan karaan in ay helaan tababar dheeraad ah oo laba-sanadle ah, ilaa inta laga gaarayo xadka da'da ugu badan, ee loo goynayey, heerarka kala duwan, iyadoo la raacayo go’aanno dambe.

Bixinta tababarka dheraadka ee laba-sanadlaha ah, waxaa góaan lagama doodaan ah ku diidi karaTaliyaha Ciidanka, sababo la xiriira xagga asluubta ama waxqabad-darro.
Marka laga reebo waxyaabaha ay dhigayaan xeerarka militariga, inta lagu jiro muddooyinka tabarka dheeraadka, Taliyaha Xoogga Dalka waxa uu awood u leeyahay in uu askariga, ka tirsan ciidanka, ka sii-daayo waajibaadka uu qaaday, kaddib markuu soo-qaddimo codsi sababeysan oo la xiriira.

**Qod. 11**
**Guutada Birmadka iyo Duulista**

Axkaamta ku xusan Xeerkan laguma dabbaqayo Guutada Birmadka iyo Duulista, sida ku cad Qod. 2aad, ee Sharciga 6 Abriil 1960, lamba. 15 «Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed», kaas oo loo soo-saarayo axkaam u gaar ah. -

Muqdisho, 4ta Maajo 1960.

Maamulaha
**Mario Di Stefano**

Wasiirka Kowaad
**Cabdullahi Ciise Maxamuud**

Waa arkay waana Diiwaangeliyey-

Diiw. lamba. 22 – xaashi lamba. 59.

Muqdisho, 23 Maajo 1960.

Hantidhowraha: **Spadaro**